


***Waxaad u baahantahay inaad  
Ogaato si Aad u caawiso  
Ilmahaaga gudaha Dugsiga***

*Hagaha Waalidka, Masuulada,  
iyo Daryeelayaasha*



Haddii qoyskaagu uu ku jiro xaalad ku meel gaadha ah ama noolaansho aan ku filnayn oo ay sababtay waayida guriyaynta, ilmahaagu waxa uu u qalmi karaa xuquuqo waxbarasho oo gaar ah iyo adeegyo.

# U qalmida Adeegyada McKinney-Vento

Haddii qoyskaagu ku noolyahay:

- hoyga;
- albeerko ama xanunta maadaama oo ayna jirin hoy kale oo kugu filani;
- gaadhi dhaxdii, dhisme madhan, ama istaanka baska;
- in dadkale lala dego maadaama oo guriga la waayay ama xaalad dhaqaale oo qalafsan;

ilmahaagu waxa uu awood u yeelan karaa inuu caawimo ka helo sharciga federaalka loogu yeedho Xeerka McKinney-Vento.

# Xuquuqaha iyo Taageerada McKinney-Vento

Caruurtaada u qalanta McKinney-Vento waxay xaq u leeyihiin

- inay helaan waxbarasho, bilaash ah oo munaasab ah oo ta shacabka ah.
- inay galaan dugsiga isla markaba, xataa hadii ayna haysan waraaqaha caadiyan looga baahan yahay inay ku jiraan.
- inay galaan dugsiga oo ay dhigtaan fasalada inta la isku keenayo waraaqaha dugsiga loogu baahan yahay.
- in lagu daro dugsiga deegaanka; ama lasii wado in la dhigto dugsigii hore (dugsigii ay hore u dhigan jireen markii ay haysteen guriga rasmiga ah ama dugsigii ugu danbeeyay ee ay dhigan jireen), hadii ay taasi tahay waxqabadkaaga.

*\*Hadii degmo dugsigu ay u aragto in dugsiga aad dooratay ayna dan ugu jirin caruurtaada, kadib degmadu waa inay keentaa qoraal sharaxaad ah oo meesha ay taagan tahay ah oo ay kuugu sheegtaa xuquuqdaada aad u leedahay inaad rafcaan ka qaadato go'aankeeda.*

- helitaanka gaadiid aad ku tagto oo aad kaga timaado dugsigii hore, hadii la dalbado tan.
- in la helo adeegyo waxbarasho oo u dhigma kuwa la siiyo ardayda kale, taas oo waafaqsan baahida caruurtaada.



# Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo

## Intii aan guurayay, ma inuu imahaygu ku jiraan isla dugsiga mise aan u wareejiyo dugsiga deegaanka?

Ka guurida hal dugsi ilaa mid kale waxay ku noqon kartaa mid ay ku wareeraan carruurta. Waa inay ka tagaan saaxiibo iyo macalimiinta ay garanayaan oo ay la qabsadaan saaxiibo cusub, macalimiin, iyo fasalo. Sababtan awgeed, caadi ahaan aad ayay ugu wanaagsan tahay ilmahaaga inuu joogo dugsigeeda/kiisa isku midka ah (dugsiga asalka ah), xataa hadduu aad u guurto aag kale.

Halkan waxaa ah qayb su'aalo ah oo laga fekerayo wax ku saabsan marka go'aan lagu gaadhayo haddii ilmahaagu uu joogi lahaa dugsi isku mid ah ama u guuri lahaa dugsi cusub halka aad ku nooshahay:

- Waa imisa jid ilmahaagu?
- Sidee rasmi u tahay meesha aad iminka degan tahayi? Ma waxa aad qorshaynaysaa inaad ku noqoto meel u dhawr dugsigii hore mise waxa aad ka fikiraysaa inaad deganaato meel u dhaw dugsigaaga wakhtigan?
- Miyaa qalbiga ilmahaagu ku xidhan tahay dugsigiisii/keedii hore? Caruurta yara waawayn ee dareenta inay aad ugu xidhan tahay dugsigiisii/keedii hore maskixiyan iyo/ama oo u dhawaaday wakhtigii ay qalinjabinayeen waxaa ku adkaan karta badalka dugsiga.
- Ilaa intee ayuu ilmahaagu ka warwarsan yahay guurida? Miyay harqinaysay badalka dugsigu?
- Miyuu badalka dugsigu ku keenayaa ilmahaaga inuu waxbarashada dib uga dhaco oo uu dhibco xun helo?
- Ma wakhti wanaagsan baa oo sanadka ah oo ilmahaagu ay tahay inuu badalo dugsiga, sida dhamaadka seemistarta ama sanad dugsiyeedka, kadib imtixaanka, ama kadib munaasabad u muhiimka ah ilmahaaga?
- Wakhti intee le'eg ayay ilmahaaga ku qaadaysaa inuu dugsiga hore iyo kan danbe u kala wareego? Gaadhi masaafada dheer loo raacayaa waxay ku yeelan kartaa saamayn waxbarashada ilmahaaga.
- Ma jiraan wax mushkilado amaan ah oo ay tahay in laga fikiro marka ilmahaagu uu dhiganayo dugsi?



# Sidee ayay noqonaysaa hadii aniga iyo dugsigu aanu isku af garan wayno dugsiga uu geleyo ilmahaygu?

Haddii adiga iyo dugsigu aad is khilaaftaan, degmadda dugsigu waa inay kuu sheegtaa adiga qoraal ahaan sababta ay ugu malaynayso ilmahaagu inuu tegayo dugsiga ka duwan midka aad doonayso. Degmaddu waa inay sidoo kale kuugu sheegtaa qoraal ahaan sida aad rafcaanka uga qaadan karto go'aankan. Ilmahaagu weli waxa uu iska diiwaan gelin karaa, soo xaadiri karaa, oo ka qayb geli karaa si buuxda gudaha dugsiga aad u malaynayso inuu isaga u wanaagsan yahay ama iyadda marka la dejinayo khilaafka.

## Yaan la xidhiidhi karaa si aan ilmahayga uga caawiyo waxbarashada?


- Degmo dugsiga kastaa waxay leedahay **wakiil waxbarashada caruurta bilaag guriga ah**. Qofkan ayaa kaa caawin kara inaad go'aansato dugsiga ku haboon ilmahaaga oo kuu sheegi doona. Wakiilka deegaanka ayaa kaa caawin kara inaad ka caawiso ilmahaaga inuu helo agabka waxbarashada, adeegyada dheeraadka ah, iyo cunto bilaash ah; inuu u diyaariyo gaadiidka lagu tegeyo ee lagaga imanayo dugsigiisa hore; oo kaa caawinaya inaad hesho taageero bulsho.
- Marka ilmahaagu uu geleyo dugsiga cusub, waxa aad dalbataa inaad la kulanto **macalinka (tiisa)**. Waa inaad kala hadashaa macalinka (miinta) ilmahaaga badanaa waxqabadka ilmahaaga. Waxa aad uga barataa si wanaagsan ugu yaraan hal macalin dugsiga ilmahaaga si aad u waydiiso wixii su'aalo ah ee ku saabsan laylisyada ilmahaaga oo aad u siiso macluumaad ka caawinaya inuu ilmahaaga wax barto.
- **Lataliyaha dugsiga** ayaa ka caawin kara ilmahaaga inuu la tacaalo isbadalka iyo caqabada. La wadaag qofkan wixii macluumaad ah ee ku saabsan sida ilmahaagu u dhaqmo marka uu joogo guriga, ama ka fikir sida iyada ama isagu ula tacaalayo taas ee ay u saamayn karto waxbarashadiisa.
- Dadka kale ee ay wanaagsan tahay in la barto waxaa weeye **maamulaha dugsiga, sarkaalka xaadiriska, diwaralka baska, shaqaalaha bulshada dugsiga, iyo kaaliyaha dugsiga**.
- **Dhamaan shaqaalaha dugsiga iyo degmadda dugsiga** ayaa ka caawin kara ilmahaagu inuu helo dhamaan adeegyada isaga ama



iyadu u baahan tahay inay ku wanaagsanaato dugsiga. Waxa aad tahay in gacan wayn ku leh waxbarashada ilmahaaga oo waa inaad kala shaqaysaa si koox ah dugsiga iyo degmo dugsiga.

## Su'aalo sidee ayay tahay inaad waydiiyo oo ku saabsan adeegyada Sharciga McKinney-Vento?

- Waayo wakiilka waxbarashada deegaanka ee dadka bilaa guriga ah? Sideen ula xidhiidhi karaa isaga ama iyada?
- Gaadiid noocee ah ayaan u heli karaa ilmahayga si uu ugu jiro isla dugsiga (dugsigiisa hore)?
- Hadii uu ilmahaygu uu badalo dugsiga, yaa naga caawin kara in loo wareejiyo duwaankiisa dugsiga cusub si dhakhso leh?
- Sidee ayuu ilmahaygu u heleyaa cunto bilaash ah marka uu joogo dugsiga?
- Sidee ayuu u heleyaa agabka waxbarasho oo bilaash ah ilmahaygu, hadii uu baahdo?
- Yaa caawin kara ilmahayga hadii uu u baahdo adeegyada waxbarashada ee gaarka ah? Sidee dhakhso loogu diyaarin karaa adeegyadan?
- Kaalmo waxbarasho oo noocee ah ayaa ilmahaygu uu heli karaa, sida barnaamijka Cinwaanka I ama wax u dhigista waxbarashada kadib?
- Barnaamijkee ayaa ka caawin kara ilmahaaga inuu kobciyo hibadiisa iyo inuu ka jawaabiyo baahiyihiisa/heeda?



- Ma jiraan isboorti, muusig, ama hawlo kale oo uu heli karo ilmahaagu?
- Sidee ayuu ilmahaygu u qaban karaa safarada waxbarasho ee fasalka ama uu uga qayb geli karaan hawlaha kale ee dugsiga hadii aanu bixin kharashka lagu tagayo?
- Ma jiraan barnaamij waxbarashada kahor ah oo caruurta yaryar ahi?

## Maxaan samayn karaa si aan u caawiyo ilmahayga gudaha dugsiga?

- Waxa aad xaqiijisaa in ilmahaagu uu qabto dugsiga maalin kasta oo uu yimaado isaga oo soo nastay waxna soo cunay.
- Waxa aad siisaa meel aamusan oo ilmahaagu uu layliska dugsiga kaga shaqeeyo, oo waxa aad u samaysaa wakhti maalin kasta aad kaga caawinayso inuu ilmahaagu ka shaqeeyo layliska guriga.
- Waxa aad u fiirsataa baahiyaa caafimaadka ee ilmahaaga oo waxa aad maarsaa mushkilad kasta oo uu qabo wakhti hore.
- Waxa aad waydiisaa ilmahaaga waxa uu ku bartay dugsiga isaga ama iyadu. Isaga ama iyadu hakuu sharaxdo. Hadii aad danaynayso waxbarashada ilmahaaga, isaga ama iyada ayaa kuu sheegi doona waxa u muhiimka ah.



## Su'aalaha Wanaagsan Waxay Sameeyaan Akhriyayaal Wanaagsan

Waydii ilmahaaga wixii kusaabsan waxa uu akhriyay oo waxay ka caawin doontaa inuu noqdo qof si wanaagsan u fikiraya

### Sheekooyinka (mala awaal):

- Maxaa dhacay? Maxaad u malayn doontaa inuu dhici doono wixii intaa ka danbeeya? Waa maxay sababtu?
- Wa ayo cida ay ku socoto sheekadu? Miyaad ka heshey isaga/iyada? Waa maxay sababtu? Miyaad samayn lahayd waxa uu isagu ama iyadu samaysay? Hadii ay maya tahay, waxaad samayn lahayd?
- Maxaad dareentay marka aad sheekada akhriday?

### Macluumaadka xogta (aan mala awaal ahayn):

- Waa maxay maqaalka ama cutubka waxa uu ku saabsanaayi? Waxa aad waydiisaa macluumaadka ugu badan ee macquulka ah.
- Maxaad u malaynaysaa inuu yahay qodobka uu wayn ee qoraagu?
- Qaybtee ayaad aad uga heshey?
- Maxaad u malaynaysaa in macluumaadkani uu muhiim u yahay?

- U akhri wax ilmahaaga maalin kasta. Caruurta yara waawayn, waxa aad u samaysaa wakhti maalin kasta ah oo adiga iyo isagu aad si aamusan wada jir wax ugu akhrisanaysaan. Ka sheekeysta waxa aad u akhriday.
- Ilmahaaga ku amaan waxa uu isagu ama iyadu qabatay, sida inuu heley dhibco wanaagsan ama inuu la ciyaaray kooxda isboortiga dugsiga.
- Dhagayso waxa uu ilmahaagu kuu sheegayo oo waxa aad kala hadashaa wixii mushkilado ah ee isaga ama iyadu qabto. Waxa aad sidoo kale kala hadli kartaa wixii mushkilad ah ee lataliyaha macalinka ama dugsiga ah.
- Waxa aad ku dhiiri gelisaa ilmahaaga inuu ka qayb qaato isboortiga iyo muusiga.

## Macluumaadka NCHE

**Khadka bilaash ah: 800-308-2145 ama  
homeless@serve.org**



NCHE waxay u sharaxi kartaa ilmahaaga xuquuqdiisa dugsiga oo waxay kuu sheegi kartaa sida loola xidhiidho isuduwaha maxaliga ah ee dugsiga degmaddaada. Isuduwaha maxaliga waxa uu caawin karaa ilmahaagu inuu isku diiwaangeliyo dugsiga oo waxa uu hubiyaa in ilmahaagu helo caawimada isaga/iyaddu u baahantahay.



**Websaydka: <http://nche.ed.gov>**

- Websaytka NCHE waxa ku jira macluumaad badan oo wanaagsan, oo waxaa ku jira websayt waalidka loogu talo geley ka caawin kara ilmahooda waxbarashada: [https://nche.ed.gov/ibt/parent\\_res.php](https://nche.ed.gov/ibt/parent_res.php).



**Faylasha Xidhmada Jeebka waalidka**


- Faylashada Xidhmada Jeebka waalidka waa faylasha halka aad ku hayn karto diiwaanada muhiimka ah iyo warqaddaha la xidhiidha dugsi dhigashada ilmahaaga. Faylku sidoo kale waxa uu sharaxaa xuquuqaha waxbarashadda ee caruurta ku jira xaaladaha hoy la'aan ah.
- Dalbo fooldherkan adiga oo si bilaash ah ula hadlaya 800-308-2145 ama booqanaya: [https://nche.ed.gov/online\\_order.php](https://nche.ed.gov/online_order.php)



# Wakiilka Deegaanka



# Isku Duwaha Gobolka ee Waxbarashada Dadka Bilaa Guriga ah



Waraqahani waxaa lagu sameeyay Tilmaamaha  
Xafiiska Maamulka Shacabka, iyada oo la  
isticmaalayo luuqad iyo macluumaadka laga heley  
Xarunta Qaran ee Waxbarashada Dadka Bilaa  
Guriga ah. Waraaqahan waxaa ilaaliya Creative  
Commons CC-BY. Wixii macluumaad ah ee  
dheeraad ah, booqo [k12.wa.us](http://k12.wa.us)



Washington Office of Superintendent of  
**PUBLIC INSTRUCTION**